

Macluumaadka marka fasaxa xanuunka

Haddii dhakhtarku sameeyo qiimeynta awood la'aantaada inaad shaqeysid ama waxbaratid xanuun ama dhawaac darteed, dhakhtarku wuxuu ku siin karaa qoraal fasaxa.

Shahaadada caafimaadka marka fasaxa xanuunka

Markaad booqanaysid dhakhtarkaaga, waxa wanaagsan inaad sharxi kartid astaamaha aad leedahay iyo sida ay u xadidayaan awoodaada inaad shaqeysid.

Markuu yimaado fasax xanuun, dhakhtarku wuxuu kuu qori doonaa shahaado caafimaad oo ay tahay inaad u gudbisid maamulahaaga. Dhakhtarku wuxuu u gudbin doonaa shahaadada Wakaalada Caymiska Bulshada Iswidhishka ah haddii aad ogolaatid, lakiin adiga laftaada ayaa gudbisan kara. Shahaadada caafimaad waxa loogu talagalay shaqaaleysiyaha iyo Wakaalada Caymiska Bulshada Iswidhishka si ay u awoodaan inay qiimeeyaan awoodaada inaad shaqeysid iyo inaad xaq u leedahay magdhowga lacageed.

Maxaad sameyn kartaa si aad u caafimaadid inta lagu jiro fasaxa xanuunka?

Fasaxa xanuunku wuxuu saameyn karaa maalmahaaga shaqo siyaabo kala duwan. Waxa fudud in qofku waayo jadwalada joogtada ah, sida wakhtiyada seexashada, jimicsi kooban iyo cunto xumo. Waxa lagayaabaa inaad cidlootid ama go'doomin ku dareentid guriga.

Si aad u dareentid caafimaad una awoodid inaad bogsatid inta lagu jiro fasaxa xanuunka, waxa fiican inaad ka fikirtid waxyaabo kooban:

- **Jadwalada iyo hurdada:** Ilaali jadwalkaaga maalinlaha adoo isku dayaya inaad kacdid subax hore oo tagtid sariirta xili hore habeenkii.
- **Maalintii:** Iskuday inaad dibada aadid in mudo ah maalinkasta. Waxay kaa caawinaysaa sidoo kale hurdo fiican.
- **Cuntooyinka joogtada ah:** Quraaco, qadeee oo cashee saacado joogto ah.
- **Jimicsiga:** Dhaqdhaqaaq inaad awoodid. Dhaqdhaqaaqa jidhku wuxuu kaa ilaalinayaa walaaca, hurdo la'aanta iyo warwarka.
- **U naxariiso naftaada:** Samee waxyaabaha aad jeceshahay ee aad ku nafistid, sida wakhti la qaadashada asxaabta, dhageysiga muusiga ama akhrinta buugta.
- **La xidhiidh asxaabtaada:** La xidhiidh dadka aad wakhtiga la qaadatid.
- **Ka fikirida shaqadaada:** La xidhiidh asxaabtaada shaqada iyo maamulaha. Waxaad weydiin kartaa adeeg caafimaadka, midowga ama qofkale oo kuu dhow wixii caawimo ee aad u baahatid.


Qorshaha bogsashada

Markaad la xidhiidhid shaqaaleysiyahaaga iyo daryeelka caafimaadka, waxa wanaagsan inaad qortid waxaad qorshaynaysid. Waxa fududaan doonta inaad xasuusatid waxaad tiri iyo inaad raacdid waxaad qorshaysatay.



Qorshaaga iyo ka dhakhtarkaaga

Tani waxay gaar ahaan muhiim ii tahay inta lagu jiro fasaxa xanuunka:



Ka codso kabka xanuunka Wakaalada Caymiska Bulshada ee Iswidhishka

Macluumaadka khuseeya shuruucda Wakaalada Caymiska Bulshada Iswidhishka iyo sida loo codsanaayo kabka xanuunka waxa laga heli karaa wabsaaydka forsakringskassan.se. Waxaad ka akhrin kartaa halkaasi waxbadan oo khuseeya xuquuqaha iyo waajibaadka aad leedahay qof xanuusan ahaan. Macluumaadka waxa lagu helaay Iswidhis iyo Ingiriisi.

Waxaad sidoo kale wici kartaa ama balansan kartaa wadasheekaysi Wakaalada Caymiska Bulshada Iswidhishka oo dhowr luuqadood ah. Waxbadan ka akhri forsakringskassan.se/sprak.

Haddii aad raadinaysid shaqo oo aad leedahay magdhow ka yimid Adeega Shaqaaleysiinta Dadweynaha Iswidhishka ama sanduuqa kabka shaqo la'aanta.

Wabsaaydka Adeegyada Shaqaaleysiinta Dadweynaha Iswidhishka arbetsformedlingen.se, waxaad ka heli kartaa macluumaadka waxa khuseeya. Macluumaadka waxa lagu helayaa dhowr luuqadood.

Haddii aad leedahay caawimo dakhli

Macluumaadka khuseeya waxa ku tacaluqa fasaxa xanuunka markaad leedahay caawimo dakhli, kala xidhiidh dawlada.

Muhiima ah inaad ka fikirtid

- Maamulahaagu wuxuu u gudbiyaa ogeysiiska xanuunka Wakaalada Caymiska Bulshada Iswidhishka oo waa inaad codsataa kabka xanuunka. Haddii aanad shaqo hayn, waxaad inaad ogeysiisaa xanuunka Wakaalada Caymiska Bulshada Iswidhishka.
- Waxaad ka arki kartaa shahaadooyinkaaga caafimaad adoo ku galaaya aqoonsigaaga intarnadka 1177.se.
- Hubi inaad haysatid macluumaadka saxda ee khuseeya heshiisyada guud iyo caymiska khuseeya shaqaaleysiintaada. Weydii maamulahaaga ama wakiilka midwogaaga.